Washington State Office of the Attorney General

# Nooca Xeerka isticmaalka Xoogga

Luuliyo 1, 2022

# Liiska Mawduucyada

**Qeexitaanada** ....................3
**Mabaadii'da Guud** ....................4
**Tixgelinnada Maamulaaya Dhammaan Isticmaallada Xooga** ....................5
Go'aan Gaarista Muhiimka ah ....................5
Xallinta Rabshada ....................5
Daryeelka Macquulka ah ....................6
Adeegsiga Xoogu waa inay Muhiim u tahay loona adeegsadaa Sabab Sharci ah ....................7
Aqoonsiga, Digniinta, iyo Fursada Ku Dhaqanka amarka Kahor intaan Xoog la Isticmaalin ....................8
Adeegsiga qoor sagarada iyo Xakamaynta la qabto Dhuunta ayaa Mamnuuc ah ....................8
Talaabada Kahortaga Khaladka ....................8
Gurmadka Degdega ah ....................8
**Noocyada Xooga** ....................10
**Farsamooyinka Xooga ee Gaarka ah** ....................11
Sunta Buufinta Oleoresin Capsicum (OC) ....................11
Hubka Saamaynta leh ....................11
Hubka Xabadaha Dheemiska ah (oo sidoo kale loo yaqaano Hubka Rasaaska Tiirada Dheer ee Dheemishka ah) ....................11
Hubka Korontada Ku shaqeeya (oo sidoo loo yaqaano Hubka Lagu Adeegsado Koronta) ....................12
Qoryaha ....................13
**Aaladaha Xakameynta oo Gaar ah** ....................14
Maaskarooyinka Afka ....................14
Suumanka Dadka lagu Xiro ....................15
**Tababarka** ....................15

# Washington State Office of the Attorney General
# Nooca Xeerka Isticmaalka Xoogga

**Ujeedada:** Xeerkaan waxaa loo sameeyay inuu sharaxaad siiyo ciidanka uuna kor u qaado badqabka dhammaan asagoo xaqiijinaaya in dhammaan farsamooyinka xallinta rabshada ee la heli karo oo haboon la adeegsado marka ay suuragal tahay, iyo in heerka xooga la isticmaalaayo uu u dhigmo khatarta ama diidmada ciidanku xalinayaan iyo sidoo kale darnaanta xeerka ciidanka booliiska ee la fulinaayo.

## Qeexitaanno

(1) **Dhuun xirka:** waa cadaadis toos ah oo la saaraayo dhuunta qofka ama hunguriga si loo ceejiyo neefta qofka. (Revised Code of Washington (RCW, Heerka Washington ee Dib loo eegay) 10.116.020).

(2) **Compression asphyxia**: heerka oksijiinta oo ku yaraada dhiiga iyo/ama talaabo kordhinaysa maadada carbon dioxide ee ku jirta dhiiga taasoo keenaysa in qofku miyir beelo ama dhinto kuwaasoo ka dhalanaaya caburinta kala fidista sanbabooyinka ayadoo qofka cadaadis laga saaraayo xabadka iyo/ama caloosha, taasoo caburinaysa neefta.

(3) **Xoog dhimasho keeni kara**: waa adeegsiga kaska oo xooga ayadoo la adeegsanaayo qoryo ama noocyo kasta oo kale oo keeni kara geeri ama dhaawac jireed oo xun. (RCW 9A.16.010).

(4) **Farsamooyinka dejinta xaalada**: Ficilka sarkaalka nabadgalyadu isticmaalo taasoo lagu doonaayo in lagu yareeyo suurtagalnimada ah in loo baahdo adeegsiga xoog inta lagu jiro dhacdo. (RCW 10.120.010 [2022 c 4 §2]). Adeegsiga xoogu maaha farsamo dejinaysa xaalad taagan. Farsamooyinka dejinta xaalada ayaa lagu faahfaahiyay qaybta “Dejinta Xaalada.”

(5) **Suurtagal ah**: suurtagalnimada in la fulin karo ama la samayn karo talaabo si loo gaaro xirista ama yool sharci ah ayadoo aan la kordhin khatarta ku dhacaysa sarkaalka ama qofka kale.

(6) **Baxsi**: fal ama talaabo qofku ka cararaayo meesha si uu u baxo uuna si ula kac ah usoo weeraraayo ciidanka booliiska.

(7) **Khatarta degdega ah ee dhaawaca daran ee jireed ama dhimashada**: ayadoo ku xiran gebi ahaanba xaalad guud ee jirta, waxaa suurtagal ah in la aamino in qof uu leeyahay awood, fursad, iyo ujeedo muuqata oo suuragal ah inuu si degdeg ah u sababo geeri ama dhaawac jireed oo daran oo uu u gaysto sarkaalka booliiska ama qof kale. (RCW 10.120.020 [2022 c 80 §3]).

(8) **Hay'ada Fulinta Sharciga**: waxaa ku jira "wakaalada booliiska ee maamulka guud ee Washington" iyo "wakaalad kasta oo booliis oo leh maamulka xadidan ee Washington" sida ku cad RCW 10.93.020.

(9) **Farsamooyinka dabacsan**: waxaa ku jira, laakiin aan ku koobneyn, digniinta afka ah, farsamooyinka dejinta xaalada, hubka korontada ku shaqeeya, aaladaha loo adeegsado oleoresin capsicum, budadka, iyo xabadaha dheemiska ah. (RCW 10.120.010).

(10) **Muhiim ah**: ayadoo ku xiran xaalada guud ee markaas taagan, qaab wanaagsan oo badel u ah adeegsiga xooga ama awooda xad dhaafka ah uusan u muuqan mid suurtagal ah, iyo in heerka xooga ama awooda xad dhaafka ah ee la adeegsanaayo ay tahay mid macquul ah oo waafaqsan saamaynta ujeedada sharci ee la fulinaayo ama si looga hortago khatar ku dhacayda booliiska ama dadka kale. (RCW 10.120.010 [2022 c 80 §2]).

(11) **Qabashada qoorta**: qabashada xawl mariidyada ama xanibaad, qabasho la mid ah, ama farsamo kale oo cadaadis la saaraayo qoorta qofka si loo xanibo qulqulka dhiiga. (RCW 10.116.020).

(12) **Ciidanka nabadgalyada**: waxaa ku jira nooc kasta oo ah "booliiska maamulka guud ee Washington," "sarkaalka booliiska awooda kooban ee Washington," iyo "sarkaal booliis oo maamul gaar ah hoos taga gudaha Washington" sida loogu qeexay erayadaas xeerka RCW 10.93.020. “Ciidanka nabadgalyada” kuma jiraan ciidanka dhaqan celinta ama shaqaalaha kale ee xabsiga, xarumaha dhaqan celinta, ama xarun dadka lagu hayo, laakiin waxaa ku jira saraakiisha dhaqan celinta ee bulshada. (RCW 10.120.010). Ciidanka nabadgalyada waxaa loogu yeerayaa saraakiisha gudaha xeerkaan.

(13) **Xoog jireed**: fal kasta oo ay u badan tahay inuu keeno xanuun jireed ama dhaawac ama fal kasta oo kale oo la saaro jirka qofka si loo leexdo, loo xakameeyo, loo xanibo, ama loo xadido dhaqdhaqaaqa qofka. Awooda jireed kuma jiraan baarista qofka, taabashada aan loo qasdin, amarada afka laga sheego, ama biingada gacanta ee sharciga waafaqsan marka uusan jirin xanuun jireed. (RCW 10.120.010).

(14) **Hubka Rasaasta Dheemishka**: waa hub ridaaya rasaas dheemish ah, sida isbuunyo 40mm ah ama danbaaburo, PepperBall ama rasaas la lamid ah, kubadaha dheemishka qarxa ama miraha digirta camal ah oo loo sameeyay inay si ku meel gaar ah u xakameeyaan qof.

(15) **Caburinta geeska ah**: heerka oksijiinta oo ku yaraada dhiiga iyo/ama talaabo kordhinaysa maadadacarbon dioxide ee ku jirta dhiiga taasoo keenaysa in qofku miyir beelo ama dhinto kuwaasoo ka dhalanaaya in qofka loo dhigo dhinac caburinaaya neef mareenadiisa aana u ogolaanayn inuu si caadi ah u neefsado.

(16) **Gaaska Indhaha ka Imaysiiya**: Chloroacetophenone (CN), O-chlorobenzylidene malononitrile (CS), iyo kiimikooyin kasta oo xasaasiyada kiciya kuwaasoo hawada lagu buufiyo si dadka loo gaarsiiyo xanuun jireed oo kooban ama dhaawac abadiyan ah. "Gaaska Indhaha ka Imaysiiya" kuna jirto oleoresin capsicum (OC). (RCW 10.116.030).

(17) **Wadarta guud ee xaaladaha jira**: dhammaan xaqiiqooyinka uu garanaayo sarkaalka hawsha hogaaminaaya, iyo xiliga, adeegsiga xooga, waxaana ku jira tallaabooyinka uu qofka ka qaado sarkaalka booliiska ee adeegsanaaya xoogaas, iyo talaabooyinka sarkaalka. (RCW 10.120.010).

(18) **Khalad samayn:** fal kasoo horjeeda sharciga ama kasoo horjeeda xeerarka marqaatiga ee wakaalada sarkaalka, marka la xaqiijiyo in falka noocaas ah uusan ahayn mid kama'a ah ama farsamo nooc ahaan. (RCW 10.93.190).

## Mabaadii'da Guud

**Waa masuuliyada aasaasigga ah ee booliiska inay ilaaliyaan ayna difaacaan nolosha dhammaan dadka.** (RCW 10.120.010). **Saraakiishu waa inay qadariyaan ayna ilaaliyaan sharafta dhammaan shaqsiyaadka ayna u adeegsadaan awoodooda qaab ka caagan eex.**

**Isticmaalka Xoogga ee saxda ah ayaa muhiim ah si loo xaqiijiyo shaqada muhiimka ah ee ilaalinta nabada kalsoonida looga dhex dhiso bulshada. Inkastoo ay jiraan xaalado shaqsiyaadku aysan ku dhaqmi doonin sharciga ilaa in lagu qasbo ama ay xakameeyaan maahee saraakiishu ayadoo adeegsanaaya xoog, saraakiishu waa inay xasuusnaadaan inay awoodooda ka qaataan bulshada iyo in isticmaalka xoog aan macquul ahayn uu dhaawacaayo sharciyada awoodaas.**

# Tixgelinnada Maamulaaya Dhammaan Isticmaallada Xooga

## Go'aan Gaarista Muhiimka ah

(1) Isticmaalka go'aan gaarista muhiimka ah ayaa ka caawin karta saraakiisha inay ka guul gaaraan himilooyinka lagu qeexay xeerkaan. Marka ay amaan tahay ayna suuragalayso, marka ay samaynayaan, ama iskudayayaan inay sameeyaan iyo inkale, la hadlida qof kamid ah dadwaynaha, saraakiishu waa inay:

- (a) Bilaabaan qiimaynta iyo qorshaynta ayadoo adeegsanaaya dhammaan xaqiiqooyinka ay hayaan kahor intaysan soo gaarin meesha;
- (b) Waa inay codsadaan ilaha xogta la heli karo, marka loo baahdo, sida kooxda caawimaada masiibada ama waaxda kale ee taqasuska u leh ama xirfadleyaasha;
- (c) Waa inay aruuriyaan xogta marka ay meesha tagaan;
- (d) Waa inay qiimeeyaan xaaladaha, khatarta, iyo halisaha;
- (e) Waa inay aqoonsadaan dookhyada xal u helida qilaafka;
- (f) Waa inay go'aansadaan talaabada ay qaadi karaan; iyo
- (g) Waa inay dib u eegis iyo dib u qiimayn ku sameeyaan xaalada markaas jirta.

(2) Ma jiro wax ku jira xeerkaan oo saraakiisha ka reebaaya qaadista talaabo degdeg ah marka ay qabsato xaalad khatar ku ah nolosha, sida toogasho toos ah. Marka ay amaan ah tahay ayna suurtagalayso, saraakiisha waa inaysan si aan loo baahnayn khatar u gelin badbqabkooda ama badqabka dadka kale ayagoo qaadaaya go'aano farsamo oo qaab aan macquul ahayn khatar u gelinaaya naftooda ama dadka kale, ayna ku jiraan, laakiin kuma koobna:

- (a) Waajihida si degdeg ah qof ayagoo aan xaalada si sax ah u qiimayn;
- (b) Inaan bad ku filan u dhexayn sarkaalka iyo qofka;
- (c) Inaysan waqti siin qofka si uu u raaco amarada; ama
- (d) Ugasii darista xaalada qaab aan macquul ahayn.

## Xallinta Rabshada

**<u>Mabda'a Aasaasiga ah: Masuuliyada Dejinta Xaalada</u>**

**Marka ay suurtagal tahay, saraakiisha ayaa adeegsan doona dhammaan farsamooyinka la heli karo iyo taatikooyinka xalinta rabshada kahor intaysan adeegsan xoog.** (RCW 10.120.020 [2022 c 4 §3]).

(1) Ayadoo ku xiran xaaladaha jira, saraakiisha ayaa haysta tiro farsamooyinka dejinta xaalada ah oo ay mid ka dooran karaan, ayna ku jiraan, laakiin kuma koobna:

- (a) Adeegsiga farsamooyinka booska iyo badelida booska si ay uga faa'iidaystaan badka iyo gaashaanka, sida dib uga bixida qofka si loo qiimeeyo loona go'aansho farsamooyinka la adeegsanaayo;
- (b) Dhigista xakameynta ama adeegsiga dhismeyaasha jiray si loo siiyo gaashaan ama difaac kale inta u dhexaysa saraakiisha iyo qofka;
- (c) Iskudayida dejinta ama qaboojinta xaalada si loo sahlo tixgelin iyo imaatinta gurmad kale oo kordhin kara suurtagalnimada xal amaan ah;
- (d) Codsiga iyo adeegsiga taageerada iyo khayraadka la heli karo, sida kooxda caawimaada masiibada, shaqaalaha gurmadka masiibada, adeeg bixiyaasha kale ee caafimaadka habdhaqanka, ama saraakiil gurmad ah, ayna ku jiraan saraakiisha ama kormeereyaasha khibrada dheeriga ah leh;
- (e) Adeegsiga tilmaamo iyo digniino afka ah oo cad;
- (f) Adeegsiga farsamooyinka xariirka qofka ee hadalka iyo ishaarada ah si loo dejiyo qofka (sida, hadal dabacsan, dejinta luuqda iyo dhaqdhaqaaqa jirka, kala qaadista gacmaha, yaraynta xarakaadka gacmaha, iyo yareynta nalalka iftiinka badan, falaashka leh iyo seeriga gaariga booliiska);

(g) Iskudayga ula hadlida qofka qaab ishaaro ah marka tilmaamaha hadalka ah aysan ku filnayn (sida, marka sarkaalka iyo qofku ku hadlaan luuqado kaladuwan, ama qofku uusan awoodin inuu maqlo ama fahmo tilmaamaha);
(h) U hadlida qaab muujinaaya qadarinta sharafta dadka (sida, in si qeexan loo sharxo talaabooyinka iyo himilooyinka sarkaalka; dhagaysiga su'aalaha iyo walaacyada qofka iyo u jawaabida qaab qadarin leh; iyo u dhaqanka qaab dabiici ah oo cadaalad ah marka ay go'aannada gaarayaan);
(i) Marka ay joogaan saraakiil badan, u daynta hal sarkaal oo la hadla qofka si looga fogaado u tartamida hadalka ama amaro qofku ku wareeraayo; ama
(j) Muujinta dulqaad ayadoo la adeegsanaayo dhammaan taatikooyinka la heli karo ee habboon iyo khayraadka si loo siiyo waqtiga ugu badan ee loo baahan yahay si loo xaliyo arinta ayadoo aan la adeegsan xoog.

## Taxadarka Macquulka ah

**<u>Mabda'a Aasaasiga ah: Masuuliyada Taxadarka Macquulka ah</u>**

**Tixgelinta sifooyinka dadka iyo xaaladaha, ayna ku jiraan carruurta, waayeelka, haweenka uurka leh, dadka aqoontooda Ingiriiisku liidato iyo dadka qaba ciladaha ama naafooyinka dhimirka, habdhaqanka, jirka, fahanka iyo fikirka, marka la go'aaminaayo in xoog jireed ama xoog xad dhaaf ah la adeegsado, iyo haddii loo baahdo, heerka ugu yar ee macquulka ah ee xooga la adeegsanaayo si loo fuliyo sharciga.** (RCW 10.120.020).

**<u>Mabda'a Aasaasiga ah: Fullinta Shaqooyinka Ilaalinta Bulshada</u>**

**Ma jiro wax ku jira xeerkaan oo xadidaaya ama xakamaynaaya awooda sarkaalka ee ka jawaabida dalabka daryeelka bulshada ama ilaalinta caafimaadka iyo badqabka, iyo adeegsiga cadadka macquulka ah ee ugu yar ee xooga muhiimka u ah fulinta shaqooyinkaas.** (RCW 10.120.020 [2022 c 4 §3]). Isla heerarka adeegsiga awooda jireed ayaa lagu dabaqayaa. Hase yeeshee, taabashada aan loo qasdin, oo imaan karta inta la ilaalinaayo bulshada, ayaan loo arkin xoog jireed.

Taxadarka Macquulka ah waxaa laga wadaa in sarkaalku uu:

(1) Marka ay suurtagal tahay, uu adeegsan doona dhammaan farsamooyinka la heli karo iyo taatikooyinka xalinta rabshada kahor intaysan adeegsan xoog. (RCW 10.120.010 [2022 c 4 §3].
(2) Tixgelinta sifooyinka iyo xaaladaha qofka si loo go'aansado adeegsiga xoog ama awood badan oo ka dhan ah qofka iyo, haddii xoog loo baahdo, si loo go'aansho cadadka macquulka ah ee ugu yar ee awooda la adeegsanaayo si loo fuliyo sharciga. Sifooyinka iyo xaaladaha noocaas ah waxaa ku jiri kara, laakiin kuma koobna, in qofku:
    (a) Uur muuqda leeyahay, ama uu sheego inuu uur leeyahay;
    (b) La ogyahay inuu yahay ilmo yar, uu u muuqdo ilmo yar, ama uu sheego inuusan qaangaarin wali;
    (c) La ogyahay inuu yahay qof nuqul oo qaangaar ah, ama uu u muuqdo qof nuqul oo qaangaar ah sida ku cad RCW 74.34.020;
    (d) Uu leeyahay astaamaha naafada ama cilada dhimirka, garaadka, kobaca ama jirka;
    (e) Uu qabo naafooyinka maskaxda ama garaadka oo badanaa la xariira isticmaalka khamriga, maandooriyaasha, waxyaabaha marqaanka, ama daawooyinka kale;
    (f) Uu yahay qof isdili raba;
    (g) Aan aqoon badan u lahayn luuqada Ingiriiiska; ama
    (h) Ay la joogaan ilmo yaryar. (RCW 10.120.020).
(3) Jooji adeegsiga xoog isla marka muhiimada xoog isticmaalku dhammaato. (RCW 10.120.020).

## Adeegsiga Xoogu waa inay Muhiim u tahay loona adeegsadaa Sabab Sharci ah

**Mabda'a Aasaasiga ah: Adeegso Keliya Heerka Ugu Yar ee Xooga Muhiimka u ah In si Amaan ah Looga Guul gaaro Yoolka Sharciga ah ee Booliiska ee Xaaladaha Markaas jira.** (RCW 10.120.020).

Dhacdooyinka booliiska qabsada ayaa degdeg u dhaca mana ahan kuwo la qiyaasi karo. Sidaas awgeed, saraakiishu waa inay sii wadaan qiimaynta muhiimka ah iyo waxtarka talaabooyinkooda, ayna ku jirto inay boos taatiko leh qaataan, si loo yareeyo suuragalnimada inay u baahdaan adeegsiga awood jireed.

(1) Si xoog jireed loogu baahdo, farsamo macquul ah oo badel u ah ayaan muuqan inay jirto isticmaalka xooguna waa inuu noqdaa mid macquul ah oo waafaqsan saamaynta ujeedada sharci ee la fulinaayo ama si looga hortago khatar ku dhacayda booliiska ama dadka kale.

(a) Macquulnimada waa in lagu qiimeeyaa muhiimada guud ee xaalada uu fahmaayo sarkaalka shaqada hagaaya, iyo waqtiga, isticmaalka xoogu, ayna ku jirto khatarta degdega ah, ficilada qofka xooga loo adeegsanaayo, ficilada sarkaalka, iyo darnaanta ujeedada sharci fulinta. Go'aaminta in xoog jireed uu macquul yahay waxaa kamid ah qiimaynta in sarkaalku sameeyay go'aanno farsamo si loo yareeyo khataraha aan loo baahnayn ee ku dhici kara naftiisa iyo dadka kale, iyo inuu adeegsaday dhammaan farsamooyinka la heli karo ee macquulka ah ee dejinta xaalada marka ay suuragal tahay kahor intuusan adeegsan xooga uuna sameeyay taxadar macquul ah markuu adeegsaday xooga.

(b) Qumanaanta talaabada waa in lagu qiimeeyaa in adeegsiga xoogu waafaqsan yahay degdega iyo darnaanta khatarta ama diidmada sarkaalku waajahaayo marka uu xooga adeegsado, iyo sidoo kale darnaanta talaabada sharci ee la fulinaayay. Khatarta ama diidmada ayaa isbadeli karta mudada dhacdadu socoto. Xooga ku habboon shaqada ayaan u baahnayn in sarkaalku adeegsado xoog isku nooc ama isku heer ah guud ahaan. Hadba inta khatartu degdega tahay ayayna u badan tahay in khatartaas keento geeri ama dhaawac jireed oo daran, ayuu kasii badan yahay xooga la adeegsanaayo.

(2) **Adeegsiga Xoogu waa inuu yahay mid ku salaysan Sabab Sharci ah.** Sarkaal ayaa xoog u adeegsan kara qof ilaa heerka muhiimka ah si uu:

(a) Uga hortago khatar degdeg ah oo keenayda dhaawac jireed oo ku dhaca sarkaalka, qof kale, ama qofka xooga loo adeegsanaayo (RCW 10.120.020);

(b) Si uu uga hortago fal danbiyeed marka ay jirto sabab macquul ah oo sheegaysa in qofku galay, uu galaayo, ama uu damacsan yahay inuu galo fal danbiyeed (RCW 10.120.020 [2022 c 80 §3]);

(c) Uu u soo xiro qof (RCW 10.120.020);

(d) Si uu qof u geeyo xabsiga marka uu amraayo ama sheegaayo sharcigu (RCW 10.120.020 [2022 c 80 §3]);

(e) Si uu uga hortago baxsad sida ku cad qodobka 9A.76 RCW (RCW 10.120.020);

(f) Si uu uga hortago in qof baxsado ama uu qofka uga hor istaago inuu ka cararo goobta lagu hayo dadka baaritaanku ku socdo, marka la xaqiijiyo in qofka loo sheegay in uu xiran yahay uusana bixi karin (RCW 10.120.020 [2022 c 80 §3]);

(g) Si uu qof u geeyo xabsiga, u qaado qof maraaya qiimeyn ama daawayn, ama uu caawimaad kale u baxsho sida ku cad cutubka 10.77, 71.05, ama 71.34 RCW (RCW 10.120.020 [2022 c 4 §3]);

(h) Si uu ilmo u geeyo xarunta difaaca marka uu amraayo ama sheegaayo sharcigu (RCW 10.120.020 [2022 c 4 §3]);

(i) Si uu u fuliyo amar maxkamadeed oo amraaya ama u sheegaaya sarkaalka inuu qof xabsiga dhigo (RCW 10.120.020 [2022 c 4 §3]);

(j) Si uu u fuliyo amarka baarista meel (RCW 10.120.020 [2022 c 4 §3]);

(k) Si uu u fuliyo amar afka ah oo uu soo saaray garsoore jooga qolka maxkamada ama amar qoraal ah oo maxkamadu ku cadaysay in sarkaalku adeegsado xoog si uu u fuliyo amarka ama codsiga (RCW 10.120.020 [2022 c 4 §3]); ama

(l) Si uu u fuliyo shaqo kale oo kasta oo ilaalinta bulshada ah, ayna ku jirto laakiin kuma koobna fulinta hubinta faya dhawrka, caawinta shaqaalaha kale ee gurmadka degdega ah iyo xirfadleyaasha caafimaadka, xirfadleyaasha caafimaadka dhimirka, shaqaalaha adeegyada bulshada, shaqaalaha gurmadka masiibada, shaqaalaha hooyga ama guryaha, ama xubin kasta oo kale oo bulshada kamid ah (RCW 10.120.020 [2022 c 4 §3]).

## Aqoonsiga, Digniinta, iyo Fursada Ku Dhaqanka amarka Kahor intaan Xoog la Isticmaalin

Marka ay amaan tahay ayna suurtagalayso, kahor isticmaalka awood jireed, saraakiishu waa inay:

(1) Xaqiijiyaan inay yihiin saraakiil booliis;

(2) Waa inay iskudayaan go'aaminta in qofku uu qabo baahi gaar ah, xaalad dhanka maskaxda ah, cilad dhanka jirka ah, naafada kobaca, cilad dhanka luuqada ah, ama xaalad kale oo saamaynaysa awooda qofka ee fahanka iyo ku dhaqanka amarada sarkaalka;

(3) Waa inay bixiyaan tilmaan iyo digniino cadcad;

(4) Inay uga digaan qofka in xoog jireed loo adeegsan doono haddii uusan amarka qaadan; iyo

(5) Waa inay qofka siiyaan fursad macquul ah oo uu ku raaco amarada digniinaha ah ee sheegaaya in xoog loo adeegsan doono.

## Adeegsiga qoor sagarada iyo Xakamaynta la qabto Dhuunta ayaa Mamnuuc ah

Sarkaalka nabadgalyada ayaan adeegsan karin ceejin ama qoor sagaaro uu ku qabto qof kale inta uu fulinaayo shaqada booliiska. (RCW 10.116.020).[1]

## Talaabada Kahortaga Khaladka

**<u>Mabada'a Aasaasiga ah: Masuuliyada Farogelinta iyo Masuuliyada Soo sheegista Khaladka</u> (**RCW 10.93.190).

Sarkaal kasta oo la aqoonsan karo oo ku jira shaqada kaasoo arka sarkaal kale oo samaynaaya ama iskudayaaya inuu sameeyo adeegsiga xoog xad dhaaf ah oo ka dhan ah qof kale waa inuu soo farogashaa marka uu awoodo si uu u joojiyo adeegsiga xooga ama iskudayga xooga xad dhaafka ah, ama si uu uga hortago isticmaalka dheeriga ah ee xooga xad dhaafka ah. Sarkaal kasta oo la aqoonsan karo oo shaqada ku jira kaasoo ah fal khalad ah oo uu galaayo sarkaal kale, ama si macquul ah oo daacadnimo leh u aaminsan in sarkaal kale oo nabadgalyo uu khakad galay, waa inuu khaladkaas u soo sheegaa hogaanka sarkaalka khaladka galay ama sarkaalka kormeerka sida ku cad xeerarka wakaaladaha uu u shaqeeyo sarkaalka khaladka arkay iyo habraacyada soo sheegista falalka noocaas ah ee sarkaalku ku kacay. (Sidoo kale akhri Xeerka Naqshada Masuuliyada Farogelinta ee Washington State Criminal Justice Training Commission's (CJTC, Guddiga Tababarka Cadaallada Danbiyada ee Washington).)

## Gurmadka Degdega ah

**<u>Mabda'a Aasaasiga ah: Masuuliyada Bixinta ama Fududaynta Gurmadka Degdega ah</u>**

**Dhammaan shaqaalaha ciidanka booliisku waa inay bixiyaan ama fududeeyaan gurmadka degdega ah si loo badbaadsho sida ugu dhakhsaha badan badqabka dadka dhaawaca ah ee jooga goobta shilka ee ay booliisku gacanta ku hayaan.** (RCW 36.28A.445). (Sidoo kale akhri Tilmaamaha Gurmadka Degdega ah ee CJTC.)

---

1 Laga bilaabo Luuliyo 1, 2022, Attorney General's Office ayaa wada dhisida fikir rasmi ah oo ku aadan arintaan si looga jawaabo codsi kayimid baarlamaanka. Su'aasha ayaa ah in RCW 10.120.020 (3) uu si sax ah ugu fasaxaayo sarkaalka booliiska inuu adeegsado qoor sagaaro ama ceejin "si uu naftiisa ama nafta qofka kale uga difaaco khatar degdega ah" ayadoo ay jirto mamnuucid gaar ah oo diidaysa talaabooyinkaas kuna cad qodobka RCW 10.116.020. Marka lasoo gabo-gabeeyo dhammaadka 2022, Fikradaha ayaa lagusoo daabici doonaa barta: https://www.atg.wa.gov/ago-opinions/year/2022.

(1) Dadka dhaawaca ah iyo dadka la xanibay waa in lagu ilaaliyaa xabsiga booliiska.

(2) Si waafaqsan tababarka, saraakiishu waa inay qaadaan talaabooyinka soo socda si ay u yareeyaan khatarta neef ku xirida iyo caburinta qofka:

  (a) Sida ugu dhakhsaha badan ee amaanka ah oo suurtagalka ah kadib marka qofka biigad lagu xiro ama haddii kale qof la xirxiray dhulka la dhigo, u leexi qofka gees adna gees ka istaag una qaad qaab kor ah kaasoo aan xanibayn neefsiga caadiga ah, marka laga reebo qofka aan miyirka lahayn. Shardigaan ayaa si gaar ah muhiim u ah marka qofka looga xiro biingada meel nugul.

    (i) Shardi dhaaf: Haddii qofku uu miyir qabo uuna sheego inuu doonaayo in dhinac kale loo dhigo, sarkaalku waa inuu u dhigaa dhinacaas ilaa in samaynta sidaas ay keenayso khatar amaan oo ku dhacda qofka, saraakiisha, ama dadka kale.

  (b) Ha saarin cadaadis muddo dheer ah xabadka, qoorta ama dhabarka, ayna ku jirto inaad ku fariisato, jilbaha saarto, ama ku istaagto.

  (c) Si joogto ah ula soco geeska qofku yaalo inta aad xirayso, maadaama uu qofku degdeg u dhiman karo uuna dhaafi karo heer neefta loo furi karo sikino gudahood. La socoshada waxaa ku jira, laakiin ku koobneyn, qiimaynta in ay qofka ku filan tahay neeftu, midabka, iyo naafo kasta oo qofku uu kuu sheegaayo.

  (d) Markasta oo ay suuragalayso marka kox qof hayso marka ciidanka jooga ay saamaxayso, sarkaalka hogaanka haya waa inuu u xilsaaraa "Sarkaalka Badqabka." Sarkaalka Badqabka ayaa la socon doona caafimaadka iyo faya qabaka qofka ilaa:

    (i) Masuuliyada lagu wareejiyo xirfadle caafimaadka (tusaale ahaan, Emergency Medical Technicians (EMT, Farsamo yaqaanada Xaalada Caafimaadka degdega ah), shaqaalaha gurmadka caafimaadka); ama

    (ii) Qofka la dhigo meel uu fariisan karo gudaha gaariga uuna la hadli karo Sarkaalka Badqabka una sheegaayo inuu caafimaad qabo, qofkuna ula muuqdo Sarkaalka Badqabka inuu badqabo uuna si caadi ah u hadlaayo.

  (e) Haddii Sarkaalka Badqabku ogaado cilad ka jirta neefsiga, midabka qofka ama cilad kale, waa inuu u sheegaa hogaankiisa.

  (f) Ha qaadin qof gacmaha ka xiran oo u yaala dhinac khatar ah.

(3) Saraakiishu waa inay bixiyaan ayna fududeeyaan gurmadka degdega ah oo gaar u ah farsamooyinka gaarka ah ee xooga.

  (a) Buufinta Oleoresin Capsicum (OC): Fursada ugu horaysa ee amaanka ah ee goobta dhacdada ee booliisku ay maamulayaan, sarkaal waa inuu qaadaa talaabo uu ku xalinaayo saamaynada OC asagoo ku falaashaaya indhaha qofka biyo nadiif ah kadibna siinaaya hawo nadiif ah, hadday suuragal tahay.

  (b) Electronic Control Weapon (ECW, Hubka Korontada Ah): Fursadaha ugu horeysa ee amaanka ah ee goobta dhacdada ay booliisku joogaan, saraakiishu waa inay ka saaraan qofka fiirirka ECW, ilaa in fiirirtu ku jiro maahee meel xasaasi ah, sida madaxa, naaska, ama gumaarka.

    (i) Fiirirka ku jira meelaha xasaasiga ah ee inuu ka saaraan qofka shaqaalaha EMT, gurmadka degdega ah ama xirfadle kale oo caafimaad.

    (ii) Fiirirka ECW waa in loola dhaqmaa khatar sun ah.

# Noocyada Xooga

**Mabda'a Aasaasiga ah: Adeegso Xooga Ugu yar ee Muhiimka ah si Looga Jawaabo Amar Diidada sida ku cad Xaaladaha jira.** (Revised Code of Washington (RCW, Heerka Washington ee Dib loo eegay) 10.120.020).

**Mabda'a Aasaasiga ah: Adeegso xoog xad dhaaf ah keliya marka ay Muhiim u tahay kahortaga Khatar Degdeg ah oo keenaysa Dhaawac Jireed ama Dhimasho.** (Revised Code of Washington (RCW, Heerka Washington ee Dib loo eegay) 10.120.020 [2022 c 80 §3 iyo 2022 c 4 §3]).

Saraakiisha lagama doonaayo inay isku dayaaan nooc kamid ah xooga kahor intaysan u guurin mid ka wayn.

(1) **Isticmaalka Xoogga ee Heerka Hoose ah**: Xooga noocaan ah ayaan loogu talo gelin waxaana yar inuu keeno dhaawac, laakiin wuxuu keeni karaa cadaadin kooban ama xanuun. Ayadoo ku xiran xaaladaha jira, ayna ku jiraan sifooyinka iyo xaaladaha qofka, dookhyada xooga ee heerka hoose ah waxaa ku jiri kara:

- (a) Farsamooyin hagaaya dhaqdhaqaaqa (tusaale ahaan, dib u riixid, jiidid, qaadis, xanbaarid);
- (b) Qabashooyinka Xakamaynta (tusaale ahaan, qoob ka xiris, xanibaada wada socota);
- (c) Farsamooyinka gacanta furan;
- (d) Lagdista; ama
- (e) Adeegsiga suunka dadka lagu xiro.

(2) **Isticmaalka Xoogga ee Heerka Dhexe ah**: Xooga noocaan ah ayaa keenaaya khatar muuqata oo keenaysa dhaawac ama waxyeelo wayn laakiin midkoodna uma badna loogumana talo gelin inuu geeri sababo.

Ayadoo ku xiran xaalada guud ee jirta, xooga jireed ee heerka dhexe ah ayaa la aqbali karaa marka qofku ku hanjabo weerar degdeg ah oo ka dhan ah sarkaalka ama dadka kale. Dookhyada xooga heerka dhexe ah waxaa ku jira:

- (a) Buufinta Oleoresin Capsicum (OC);
- (b) Hubka xakamaynta elektarooniga ah;
- (c) Hubka Dheemishka ah;
- (d) Qaniinyada eeyada ciidanka ama dhaawaca ka dhasha qaniinyada eeygu u gaysto qofka;
- (e) Hubka jugta gaysta (marka laga reebo hubka jugta ee lagu dhufto madaxa, qoorta, dhuunta, ama araxda); ama
- (f) Feerka, laadadka ama weerarada kale ee loo gaysto jirka sarkaalka.
    - (i) Saraakiishu waa inay keliya adeegsadaan farsamooyinka weerarka ee lagu beegsado madaxa qofka kuwaasoo ah difaac shaqsi ah, ama difaaca dadka kale. Weerarida madaxa qofka ayadoo la adeegsanaayo feer, suxulka, jilibka, iyo cagaha, waa inaan loo adeegsan qaab xanuujin ah.

(3) **Xooga Xad Dhaafka ah:** Sarkaal ayaa adeegsan kara xoog xad dhaaf ah oo ka dhan ah qof kale keliya marka xooga xad dhaafka ah uu muhiim u yahay kahortaga khatar degdeg ah oo keenaysa dhaawac jireed ama geerida sarkaalka ama qof kale. (RCW 10.120.020). Saraakiishu waa inaysan u adeegsan xoog xad dhaaf ah shaqsiyaadka khatarta u gaysanaaya naftooda aana keenayn khatar degdeg ah oo keenaysa geeri ama dhaawac daran oo jireed oo ku dhaca qof kale ama sarkaalka. Xooga Xad Dhaafka ah waxaa ku jira**:**

- (i) Hubka jugta gaysta ayaa lagu dhuftaa madaxa, qoorta, dhuunta, ama araxda;
- (ii) Ku dhufashada madaxa qofka walax adag, oo xoog badan;
- (iii) Ridista rasaas hubka oo lagu rido qof; ama
- (iv) Ku weerarista gaari si kas ah qof aan ku jirin gaari.

# Dooro Farsamooyinka Xooga

<u>**Mabda'a Aasaasiga ah: Markay suuragal tahay, Adeegso Farsamooyinka La Heli Karo ee Habboon ee aan Hubka ahayn Kahor Intaadan Adeegsan Xooga Xad Dhaafka ah**</u> (RCW 10.120.020).

(1) Wakaaladu waa inay farsamooyinka aan xooga badan u baahnayn siisaa si saraakiishu u adeegsadaan. (RCW 10.120.020 [2022 c 4 §3]).

(2) Saraakiishu waa inay adeegsadaan dhammaan qalabka si waafaqsan tababarka iyo tilmaamaha shirkada qalabka samaysay.

## Buufinta Oleoresin Capsicum (OC)

(1) OC waa maado qofka xasaasiyad ku kicinaysa taasoo keenaysa dareenka gubashada daran oo ku dhaca indhaha, sanka, afka, iyo oogada, taasoo keenaysa isku qabashada, ilmaynta iyo bararka indhaha, iyo sidoo kale qufac, cabur, iyo in qofku haftoodo.

(2) Kadib marka buufinta koowaad ee sunta OC, buufin kasta oo xigta waa in sidoo kale sabab cad loo adeegsadaa.

(3) Buufinta OC kuma haboona goobaha xiran, ee dadka badan oo ay keenayso in suntu gaarto shaqsiyaadka ka baxsan dhacdada, marka laga reebo in buufinta OC ay tahay dookha keliya ee awooda ku haboon dhacdada. Ciidanka adeegsanaaya OC ayaa iskudayi doona inay ka fogaadaan ama yareeyaan in dadka kale ay si kama' ah u gaarto suntu.

## Hubka Jugta

(1) Hubka jugta ee wakaaladu samayso ayna ogolaatay waxaa caadiyan kamid ah budadka.

(2) Saraakiishu waa inaysan si kas ah qofka ugu dhufan meelaha khatarta ah, ayna ku jiraan madaxa, qoorta, wajiga, dhuunta, araxda, gumaarka, ama kalyaha ilaa in xoog xad dhaaf ah la ogol yahay maahee.

(3) Ciidanka waa inaysan hubka jugta leh u adeegsan qof ay ishayaan marka digniinta adeegsiga hubka jugta aysan ku haboonayn khatarta jirta.

(4) Saraakiishu waa inay dib u qiimeeyaan waxtarka nabarada hubka jugta isla marka ay badqab noqoto ayna suurtagalayso, haddii uusan wax tarayna, waa inay u wareegaan yool kale ama farsamo kale ama dookha xooga jireed.

## Projectile Impact Weapons (oo sidoo kale loo yaqaano Hubka Saamaynta Dheeriga ah leh)

(1) A Projectile Impact Weapon (PIW, Hubka Dheemiska ah) waxaa ka dhaca rasaas aan waxyeelo daran lahayn waxaana loogu talagalay inuu muddo, si ku meel gaar ah u naafeeyo, ama xanuun kooban u gaysto qofka ayadoo asagoo aan xanibayn jirka qofka.

(2) Saraakiisha waa in loo tababaraa adeegsiga PIW kahor intaysan adeegsan marka ay ku jiraan shaqooyinka booliiska.

(3) Marka ay amaan tahay ayna suurtagalayso, sarkaal doonaaya inuu adeegsado hubka PIW waa inuu u sheegaa sarakaiisha kale ee goobta jooga kahor intuusan hubka ridin.

(4) Sarkaalku waa inuu beegsadaa barida, bawdada, dhudhunka, iyo meelaha murqaha waawayn.

(5) Saraakiisha adeegsanaaya hubka PIW waa inay qiimeeyaan waxtarka PIW kadib ridista halkii xababa. Haddii loo baahdo in PIW darandoori loo rido, saraakiishu waa inay iskudayaan inay toogtaa meelo kaladuwan.

(6) Isticmaallada Xadidan. PIW waa in aan loo isticmaalin xaaladaha soo socda ilaa in adeegsiga xoog xad dhaaf ah la ogolaado:

  (a) Ku shiishida PIW si kasta madaxa, qoorta, xabadka, ama gumaarka qofka ilaa in xoog xad dhaaf ah la ogolaado maahee.

  (b) Diirad toogasho oo ka duwan sida ku cad tilmaamaha shirkada samaysay PIW.

  (c) Qofka taagan saaran joog sare leh (tusaale ahaan, jaranjaro, iskaa faale, meel u dhow cirifka buur, wim.) ilaa in dedaallada macquulka ah la adeegsaday maahee si looga hortago ama loo yareeyo dhaawaca la xariira soo dhicida (tusaale, hoos dhigista qofka shabaqa badbaadada).

## Electronic Control Weapons (oo sidoo kale loo yaqaano Hubka Tamarta Korontada)

(1) Electronic control weapon (ECW, Hubka Korontada Ku shaqeeya) waa aalad la qaadan karo taasoo rida maaso/shooga korontada kuwaasoo danabka ama qulqulka korontada xanbaarada loogu talagalay in qofka muddo kooban lagu curyaamiyo.

(2) Soo saarista iyo Sidashada ECW:

(a) ECW la ogolaaday waxaa keliya adeegsan kara saraakiisha shahaadada ku haysta isticmaalkeeda sanad kastana ku qaata shahaado cusub.

(b) Saraakiisha la siiyo ECW waxaa laga doonayaa inay u isticmaalaan hubka aan waxyeelada lahayn.

(c) Marka ay raacaan tababarka, saraakiisha sita ECW ayaa hubin doona shaqada aalada oo hubin doona jaajarka ku haray baytariga kahor biloowga tooko shaqeed kasta. Saraakiishu waa inay u soo sheegaan cilado kasta kormeeraha ama shaqaalaha kale ee ku shuqul leh.

(3) Heerarka Isticmaalka:

(a) Saraakiishu waa inay ku qaataan ECW geeska taageerada ee jirka, waana inay marka ay jiraan xaalado daran, ay lasoo baxaan, soo bandhigaan ayna ku adeegsadaa aalada gacanta taageerada (gacanta aan lagu ridin bastoolada).

(b) Saraakiishu waa inaysan qabsan ECW iyo hubka si xariir ah ilaa in xaalado daran jiraan.

(c) Saraakiishu waa inay beegsadaan meelaha ka baxsan madaxa, qoorta, xabadka, ama hubnaha taranka.

(d) Saraakiishu waa inaysan si kas ah ugu adeegsan ECW yo badan isku qof, ilaa in adeegsigii koobaad ee hubku uu si cad u fashilmay.

(e) Saraakiishu waa inay yaqaananaan isticmaalka koowaad ee ECW uusan ahayn in qofka la xanuujiyo. Qaybta qaniinyada waa in keliya la isticmaalaa marka ay muhiim tahay si loo dhamaystiro xakamaynta markaas oo keliya hal qayb ay ku dhagan tahay qofka, labada qayboodba ku dhagan yihiin meel dhow, ama marka dookha xakamaynta ka ciqaabta fudud la heli karo uuna ku habboon yahay.

(f) Saraakiishu waa inay yaqaanaan in isticmaallada badan ee ECW ay kordhinayso khatarta dhaawac daran oo jireed ama dhimasho.

(g) ECW waa in loo adeegsadaa hal mar muddo shan sikin ah ama ka yar, kaasoo kadib uu sarkaalku qiimaynaayo xaalada. Sarkaalku waa inuu adeegsadaa keliya tirada ugu yar ee inta jeer ee muhiimka ah si uu u xakameeyo qofka.

(h) Saraakiishu waa inay ogaadaan in haddii ay adeegsadeen ECW saddex jeer ayna ku adeegsadeen qof qofkuna uu sii wado inuu dagaalamo, in aalada ECW aysan waxba ka tarayn qofka sarkaalkuna wa inuu adeegsadaa dookhyada kale.

(i) Saraakiishu waa inay awoodaan inay si qeexan u cadeeyaan una qoraan sababta isticmaal kasta oo aalada ECW ah.

(4) Isticmaallada Xadidan. ECW waa in aan loo isticmaalin xaaladaha soo socda:

(a) Qof ka cararaaya goobta, oo aan lahayn sababaha kale.

(b) Qof gacmaha biingad looga xiray ama haddii kale la xanibay ilaa in xoog xad dhaaf ah la ogol yahay maahee.

(c) Qofka saaran joog sare leh (tusaale ahaan, jaranjaro, iskaa faale, meel u dhow cirifka buur, wim.) ilaa in dedaallada macquulka ah la adeegsaday maahee si looga hortago ama loo yareeyo dhaawaca la xariira soo dhicida (tusaale, hoos dhigista qofka shabaqa badbaadada).

(d) Darawal markaas wada gaari istaaran, ayna ku jiraan gaariyaasha, taraagyada, mootooyinka, ATV yada, baaskiilada, ama iskuutarada ilaa in adeegsiga xoog xad dhaaf ah la ogol yahay.

(e) Meel kasta oo sarkalku ogyahay ama uu haysto sabab uuu ku aamino in uu yaalo wax guban kara, khatar kicin kara ama qarxi kara kaasoo ka kici kara meesha, ayna ku jiraan laakiin kuma koobna sunta OC oo leh maadada holacda ee propellant, gaasooliin, gaaska dabiiciga ah, ama propane.

## Qoryaha

(1) Qori waa hub leh rasaas uuna wato sarkaalka ciidanka oo buuxiyay shuruudaha gaarka ah ee qoriga ee wakaalada ama loo ogolaaday hub gaar ah ahaan uuna ogolaaday hogaanka wakaalada booliiska.

(2) Saraakiisha waxaa keliya loo ogol yahay inay ku ridaan xabada qofka marka ay jiraan xaalado adeegsiga awooda xad dhaafka ah la ogol yahay. Mar kasta oo hubka la rido waa in sababtiisa la cadeeyaa.

(3) Ku taagida iyo Lasoo Bixinda Qoriga:

- (a) Saraakiishu waa inay qoriga ku qabtaan qofka keliya marka xoog xad dhaaf ah loo ogol yahay.
- (b) Saraakiishu waa inay keliya lasoo baxaan qoriga qaab tartiib ah oo diyaar garoow ah (tusaale, aysan cidna ku shishayn laakiin ka horeya sarkaalka) marka sarkaalku uu samaynaayo baaritaan macquul ah oo ku salaysan xaalada guud oo ah in dhibaato dhici karta markaas oo awooda xad dhaafka ah la ogol yahay.
- (c) Marka la go'aansho in adeegsiga xoog xad dhaaf ah muhiim yahay, saraakiishu waa inay, sida ugu dhakhsaha badan ee amaanka ah suurana galaysan, hoos ugu dhigaan, u dabciyaan, ayna meel amaan ah gashtaan qorigooda.
- (d) Ku qabashada qori qof waa isticmaalka xoog ay tahay in lasoo sheego sababteeda iyo xaaladaha ku xeerana waa in la diiwaan gashaa sida ku cad habraacyada lagu dejiyay barnaamijka gobalka oo dhan ee uruurinta xogta isticmaalka xooga ee gobalka oo dhan. (RCW 10.118.030).

(4) Marka ay suurtagalayso, saraakiishu waa inay digniin afka ah baxshaan si ay ugu sheegaan inay adeegsan doonaan qoriga.

(5) Kahor go'aanka adeegsiga qoriga, saraakiishu waa inay ka fakaraan xaaladaha dabka, xabada oo kusoo laabata, dadka u dhow qofka, kusoo laabashada xabada, iyo khataraha kale ee nolosha.

(6) Isticmaallada Xadidan:

- (a) Saraakiishu waa inaysan u adeegsan qoryaha hubka jugta ahaan marka laga reebo in xoog xad dhaaf ah loo ogol yahay.
- (b) Ridista qori lagu rido ama lagasoo rido Gaari Soconaaya:
  - (i) Saraakiishu hub kuma ridi karaan gaari socda ilaa inay muhiim tahay maahee si looga difaaco dadka kale khatarta degdega ah ee waxyeelada jireed ee daran oo ka dhalanaysa isticmaalka darawalka ama qof rakaab ah ee hubka wax dila. Gaariga ayaan loo arkayn hub dilaa ah ilaa in darawalku uu u adeegsanaayo maahee gaariga inuu wax ku dilo aanana lahayn qaabab kale oo macquul ah si looga hortago khatar waxyeelo daran uuna heli karo sarkaalku. (RCW 10.116.060).
  - (ii) Marka la heli karo, saraakiishu waa inay iskudayaan inay ka wareegaan jidka gaari socda halka ay ku ridi lahaayeen hubka darawalka.
  - (iii) Saraakiishu waa inaysan toogan qayb kamid ah gaariga si ay iskugu dayaan inay gaariga istaajiyaan.
  - (iv) Saraakiishu waa inaysan xabada kasoo ridin gaari socda, ilaa in qofku uu khatar degdeg ah ku yahay sarkaalka iyo qof kale asagoo adeegsanaaya xoog dilaa ah.

(7) Isticmaallada Mamnuuca ah. Saraakiishu waa inaysan adeegsan qori inta lagu jiro xaaladaha soo socda:

- (a) Marka ay u muuqato in qof aan waxba galabsan uu dhaawacmi karo.
- (b) Ridista "xabad digniin ah."
- (c) Ku ridista ama ku qabashada qori qof khatar ku ah keliya naftiisa aana haysan awood muuqata, fursad, ama damac keeni kara dhimasho ama dhaawac jireed oo daran oo degdeg ah oo ku dhaca sarkaalka ama qof kale.
- (d) Ku ridista ama ku qabashada qori qof khatar ku ah keliya hanti aana haysan awood muuqata fursad ama damac keeni kara dhimasho ama dhaawac jireed oo daran oo degdeg ah oo ku dhaca sarkaalka ama qof kale.

# Xulashada Aladaha Xakamaynta

Sabab la xariirta in aaladaha xakameynta loo sameeyay in la qasbo, la xakameeyo, la xanibo, ama la qabto dhaqdhaqaaqa qofka, adeegsiga aaladahaan waa xoog jireed dhammaan shuruudaha maamulaaya isticmaallada xooga jirka ee lagu faahfaahiyay xeerkaan ayaan qabanaaya.

## Qalabka afka iyo Sanka

(1) Qalabka afka iyo sanka (oo mararka qaar loogu yeero "afxirka," "maaskarada wajiga," ama "sharabadyada wajiga,") waa aalad maro ah oo lagu xiro madaxa iyo wajiga qofka si looga hortago ama loo yareeyo faafitaanka cudur caabuqa ka dhasha oo soo raaca calyada, duufka, iyo dhiiga.

(2) Heerka Isticmaalka:

- (a) Sarkaal u adeegsan kara gafuur xirka marka uu sharciyan xakamaynaayo ama iskudayaayo inuu xakameeyo qof calyo tufaaya ama qaniinaaya.
- (b) Saraakiisha adeegsanaaya gafuur xirka waa inay xaqiijiyaan in gafuur xirku si fiican ugu xiran yahay si waafaqsan tilmaamaha shirkada samaysay si ay u helaan hawo ku filan si qofka la xiraayo uu caadi ugu neefsado.
- (c) Keliya saraakiisha sida guusha leh u dhameystey tababarka wakaaladu ogolaaday ee adeegsiga gafuur xirka ayaa loo ogol yahay inay adeegsadaan.
- (d) Saraakiishu waa inay keliya adeegsadaan gafuur xidhada wakaaladu siisay.

(3) Isticmaallada Xadidan:

- (a) Shaqsiyaadka lagu buufiyay OC waa in laga sifeeyaa sunta aan neefteedu u dhibin kahor intaan lagu xirin gafuur xir.
- (b) Shaqsiyaadka qaba dhibaatada caafimaadka ee la xariirta dhimirka, isticmaalka gafuur xirka ayaa kicin karta heerarka walaaca. Saraakiishu waa inay sameeyaan xaqiijin ayna si joogto ah u qiimeeyaan xaalada si ay qofka uga saaraan gafuur xirka sida ugu dhakhsaha badan ee haboon.

(4) Isticmaallada Mamnuuca ah. Saraakiishu waa inaysan xiran gafuur xirada xaaladaha soo socda sabab la xariirta inay khataruhu ku badan yihiin:

- (a) Marka qofka la xiraayo uu ka dhiig baxaayo meel u dhow afka ama sanka.
- (b) Qof markaas matagaaya. Haddii qofku uu matago asagoo xiran gafuur xirka, gafuur xirka Waa in si degdeg looga saaraa lana tuuraa.
- (c) Qof sheegay inuu qabo xanuun saamaynaaya neeftiisa, ama muujiya astaamaha neeftu inay dhibayso ama uu la harjadaayo.

(5) Marka ay jirto xaalad caafimaad oo degdeg ah, gafuur xirka waa in degdeg looga saaraa qofka.

(6) Kahor isticmaalka gafuur xirka, sarkaal waa inuu uga digaa qofka uuna siiyaa waqti ku filan qofka si uu ugu dhaqmo amarada sarkaalka. Haddii la adeegsado, sarkaalku waa inuu ka bixiyaa gafuur xirka sida ugu dhakhsaha badan marka khatarta calyo tufida ay dhammaato, ama marka sarkaalku ogaado in gafuur xirka aan hadda kadib loo baahnayn.

(7) Kadib adeegsiga gafuur xirka iyo marka ay amaan tahay, saraakiishu waa inay qofka fariiisiyaan ama gees u seexshaan waana inay la socdaan qofka ilaa gafuur xirka laga baxsho. Saraakiishu waa inay caawiyaan marka ay kaxaynayaan qofka sabab la xariirta inuu dareemi karo naafanimo ama aragiisa caad fuuli karo.

(8) Isticmaalka gafuur xirka waa in la qoraa.

(9) Gafuur xirka waa in la iska tuuraa kadib isticmaal kasta.

## Suunka dadka lagu Xiro

(1) Suunka dadka lagu xiro waa suun loogu talagalay in lagu xiro cagaha qofka si loo xakameeyo qof weerar ah.

(2) Saraakiishu waa inay keliya adeegsadaan suumanka qofka lagu xiro ee wakaaladu siisay.

(3) Isticmaallada Mamnuuca ah: Saraakiishu waa inaysan ku xariirin suunka biingadaha gacanta ama noocyada kale ee qalabka dadka lagu xiro (tusaale, "isku xirista lugaha iyo gacmaha" qof).

(4) Marka suunka qofka lagu xiro la adeegsado, saraakiishu waa inaysan qofka dhabac-dhabac u seexin.

(5) Saraakiishu waa inay isha ku hayaan shaqsiyaadka lagu xiray suunka ayna qaadaan talaabo degdeg ah, haddii loo baahdo, si ay u difaacaan caafimaadka iyo badqabka qofka.

(6) Saraakiishu waa inay joojiyaan adeegsiga suunka marka baahida loo qabay dhammaato.

# Tababarka

(1) Dhammaan saraakiisha iyo koreereyaashu waa inay qaataan tababar waafaqsan xeerkaan ugu yaraan sanad kasta. Tababarka waa in:

(a) Uu noqdaa iskudarka casharka fasalka iyo barashada farsamada tooska ah,

(b) Waa inay ku jiraan iskaashatada bulshada, marka ay quseyso, ayna suuragal tahay,

(c) Waa in lagu daraa aqoonta dhaqanka si loo fahmo bulshada sida khaladka ah uu u saamaynaayo, iyo sida khibradaha ku salaysan isirka ee booliiska iyo nidaamka cadaalada danbiga ay u saamayn karto shaqada booliiska.

(2) Xeerkaan waa in lagu dabaqaa taatikooyinka difaaca ee manhajka.